Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta Rasmiga ah

الجريدة الرسمية

Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 OCTOBER 2023** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# BILAHA

# APRIL - OCTOBER

# 2023

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 130** **Tariikh: 19/06/2023**

**XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA RUKHSADDA KORANTADA**

XRW - BIXIT
20 JUN 2023
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (i) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqada summadeedu tahay **WTKHB/XW/040/23** ee ku taariikheysan Juun 18, 2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23 ee 19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda ay leeyihiin meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23** ee **19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana **Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada.**

## Qodobka 3aad

Xeer Nidaamiyaha Rukhsadda Korantada waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA — OFFICE OF THE PRIME MINISTER — FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/061/23
TAARIIKH: 09/07/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

1. Magaca Xeer-nidaamiyaha: ........................................................................2
2. Baaxadda Xeer-nidaamiyaha: .....................................................................3
3 Ereybixin ..........................................................................................3
4 Habka Codsiga.....................................................................................5
5 Shuruudaha Mudashada Rukhsadda..............................................................5
6 Foomka Codsiga ...................................................................................6
7 Macluumaadka Iyo Dukumeentiyada La Socda Codsiga ...........................................6
8 Kharashka Qabshada Codsiga......................................................................6
9 Qabashada Codsiga ................................................................................6
10. Xog Dheeraad ah ................................................................................6
11. Ogeysiinta Diiwaangelinta Codsiga ee wakhtiga saxda ah ....................................7
12. Ogeysiinta Dadweynaha ee Codsiga ............................................................7
13. Diidmada iyo Dhegaysiga .......................................................................7
14. Oggolaanshaha ama diidmada Rukhsadda .........................................................8
15. Wax ka bedelka Rukhsadda la bixiyay: .........................................................9
16. Cusboonaysiinta Ruksadda ......................................................................10
17. Joojinta Rukhsadda .............................................................................10
18. Baabi'inta Rukhsadda ...........................................................................12
19. La Noqoshada Rukhsadda .........................................................................13
20. Dib-u-eegista iyo Racfaanka ....................................................................14
21. Ka noqoshada Codsiyada .........................................................................14
22. Wax ka bedelka ama burinta Xeerarka ...........................................................14

# CUTUBKA 1aad

## QODOBBO GUUD

## 1. Magaca Xeer-nidaamiyaha:

**a.** Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Rukhsadda Korontada, 2023.

**b.** Xeer-nidaamiyahan waxa uu dhaqan gelayaa taariikhda uu meel mariyo Golaha Wasiirrada, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

## 2. Baaxadda Xeer-nidaamiyaha:

**A.** Xeer-nidaamiyahani waxa uu khuseeyaa dhammaan Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee cusub iyo kuwa hadda jira, iyo sidoo kale shirkad kasta oo gaar loo leeyahay iyo mid guud oo ku lug leh:

- **I.** Dhalinta, ka ganacsiga, soo dejinta ama dhoofinta, gudbinta ama qaybinta tamarta korontada, ama
- **II.** Qaybinta tamarta korontada ee macaamiisha
- **III.** Hawlaha maaraynta hannaaka gudbinta korontada

**B.** Dhammaan Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee shaqeeya, haddii aan looga dhaafin Qodobka 2.C ee hoose, waa in ay soo gudbiyaan codsigooda Rukhsadda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyaga oo raacaya qaabka loo qoondeeyay laba (2) bilood ka dib faafinta Xeerarkan.

**C.** Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee shaqeeya ama kuwa cusub oo wadarta awooddooda dab-dhalin ee rakiban aysan dhaafsiisnayn < 50 kW > ama u adeega tira macaamiil ah oo ka yar <500> waxaa laga dhaafayaa shuruudaha qaadashada Rukhsaddan.

**D.** Dab dhalinta aan ganacsiga ahayn ee aan ka badnayn < 2 MW> waxaa laga dhaafayaa shuruudaha qaadashada Rukhsaddan.

**E.** Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee jira ama kuwa cusub ee wadarta awoodda dab dhalintooda ee rakiban aysan dhaafsiisnayn < 5 MW > ama u adeega tira macaamiil ka yar < 10,000> waxa ay u qalmaan in ay codsadaan Rukhsad guud. Adeeg-bixiyeyaasha Korontada ee ka sarreeya heerarkan waa in ay u codsadaan Rukhsado kala duwan hawlahooda Dab dhalinta, Gudbinta iyo Qaybinta.

## 3 Ereybixin

**A.** Xeer-nidaamiyana, haddii aan si kale loo dhigin,

I. "Sharciga" waxaa loola jeedaa  Sharciga Korontada, 2023;

II. "Codsiga" waxaa loola jeedaa Codsiga Rukhsad, ama wax ka beddelka, cusbooneysiinta, ama kordhinta muddada Rukhsadda si waafaqsan Sharciga;

III. "Hay'adda" macnaheedu waa Hay'adda Korontada Qaranka;

IV. "Biil" waxaa loola jeedaa curaarta lacageed ee macaamiisha laga qaadayo ama looga baahan yahay in uu ku bixiyo isticmaalkiisa korontada;

V. "Xeerarka Ganacsiga" waxaa loola jeedaa mabaadi'da iyo curfiga ganacsi ee laga wada aqbalsanyahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

VI. "Macaamiisha" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

VII. "Maalmo" waxaa loola jeedaa maalmo-shaqo, marka laga reebo maalmaha Jimcaha, iyo maalmaha ciidaha ee u astaysan Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

VIII. "Qaybinta" waxa ay leedahay macno la mid ah sida lagu qeexay sharciga;

IX. "Hay'adda Korontada Qaranka" ama "Hay'adda" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

X. "Adeeg-bixiyaha Korontada ee Jira/Shaqeeya" waxaa loola jeedaa Adeeg-bixiye koronto oo shaqaynayay ka hor taariikhda uu xeer-nidaamiyahani dhaqangelay;

XI. "Khidmadda" waxaa loola jeedaa lacagta ku waajibta adeeg-bixiye koronto ama Rukhsadle, taas oo ay Hay'addu dejiso;

XII. "Rukhsadda" waxa ay leedahay macne la mid ah kan ku qeexan Sharciga;

XIII. "Rukhsadlaha" wuxu leeyahay macne la mid ah kan ku qeexan Sharciga;

XIV. "Bisha" macnaheedu waa bisha miilaadiga;

XV. "MW" waxaa loola jeedaa halbeegga cabirka korontada ee Meegawaatka;

XVI. "Sarkaal" waxaa loola jeedaa shaqaale ama wakiil idman oo Hay'adda ka socda;

XVII. "Qofka/Shakhsi" waa shakhsi, shirkad, shuraako, ama urur kasta oo shakhsiyaad isu tagay ah haddii la shuraakeeyo ama aan la shurkaayninba;

XVIII. "Xeer-nidaamiyahan" waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Rukhsadda (dokumentigan);

XIX. "Tamarta is Cusboonaysiisa " waxay leedahay macne la mid ah sida lagu qeexay Sharciga;

XX. "Jadwalka" waxaa loola jeedaa lifaaqyada xeerkan ;

XXI. " Gudbinta" waxay leedahay macno la mid ah sida lagu qeexay Sharciga.

**B** Haddii aan si kale loogu sheegin, Xeer-nidaamiyahan:

I. Erayada sheegaya lab ama dheddig waxaa ku jira jinsiga kale, kuwa kelida sheegayana waxa soo galaya wadarta, caksiguna waa sax.
II. Erayada ama tibaaxaha lagu isticmaalo Xeer-nidaamiyahan laakiin aan la qeexin waxa ay lahaanayaan macnaha ay ku leeyihiin Sharciga Korontada, 2023;
III. Tixraac walba oo lagu sameeyo qodob sharci waxaa soo galaya wax kabadellida lagu sameeyo ama qodobbada sharci ee kale ee hadba lagu baddelo iyo Xeer-nidaaminnada iyo wareegtooyinka kale ee ka dhasha waqti ka waqti;
IV. Haddii taariikh Xeer-nidaamiyahani waajibiyay in hawl qabsoonto aanay ahayn maalin shaqo, hawshaas waa in ay qabsoonto maalinta shaqo ee xigta.

# QAYBTA 2AAD

## CODSIGA RUKHSADDA

### 4 Habka Codsiga

**a.** Iyada oo la raacayo Qodobka 14aad ee Sharciga Korontada Qaranka, Hay'addu waxa ay awood u leedahay in ay oggolaato oo ay bixiso Rukhsadaha korontada.
**b.** Codsiga Rukhsadda waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ku socda Hay'adda oo lagu keenayo gacanta ama lagu diraa boostada caadiga ah ama loo soo dhiibo gaarsiiye keena xarunta Hay'adda. Waxaa kale oo lagu soo gudbin karaa codsiga Rukhsadda hab elektarooni ah iyada oo lagu soo dirayo ciwaanka Hay'addu u astaysay ee rasmiga ah.
**c.** Codsiga waa inuu saxeexaa oo taariikhda ku qoraa wakiilka idman ee Codsadaha.
**d.** Codsiga waa in lagu soo gudbiyaa saddex (3) nuqul oo waraaqo ama qaab elektarooni ah ee habka "Microsoft Office" kuwaas oo ku jira "USB drive".

### 5 Shuruudaha Mudashada Rukhsadda

**a.** Codsaduhu waa in uu muujiyaa in uu awoodo dhaqaale ahaan, farsamo ahaan, iyo maamul ahaanba ku filnaanshaha hawlaha Rukhsadda.
**b.** Codsaduhu waa in uu muujiyaa awoodda uu u leeyahay in uu ku abaabulo shaqaalaha looga baahan yahay dhinac kasta oo ka mid ah dhinacyada soo socda, oo kala ah:
I. Qorshaynta, injineernimada, dhismaha iyo maaraynta xarumaha dab-dhalinta iyo qaybinta;
II. Hawlaha iyo dayactirka xarumaha dab-dhalinta iyo qaybinta;

III. Xiriirka macaamiisha
IV. Maamulka ganacsiga oo ay ku jiraan xisaabinta, biilasha, qaansheegadka, iwm.;
V. Maamulka, maaliyadda, maaraynta, sharuucda iyo xeerarka, iyo xisaabaadka.
VI. Deegaanka, caafimaadka iyo bedqabka;

**c.** Waa in loo hoggaansamo shuruudaha farsamo ee shaqaalaha ka hor inta aan la samayn ama aan la guda galin ganacsiga Rukhsadda loo qaatay.

**d.** Codsaduhu waa in uu siiyaa Hay'adda faahfaahinta xirfadlayaasha iyo shaqaalaha taageera ee uu ku hawlgaliyay shaqo wakhti buuxda ah, ka hor inta uusan bilaabin ganacsiga uu Rukhsadda u dalbanayo.

**e.** U hoggaansanaanta codsadaha ee kor ku xusan waa in lagu muujiyaa sida ku cad codsigooda Rukhsadda.

## 6 Foomka Codsiga

Codsigu waa inuu ahaadaa qaabka lagu sheegay Jadwalka 1C ee Xeer-nidaamiyahan waana in uu ka koobnaadaa macluumaadka lagu cayimay. Foomka codsiga waxaa laga heli karaa xafiiska Hay'adda ama waxaa laga soo dejisan karaa barta internet-ka ee Hay'adda.

## 7 Macluumaadka Iyo Dukumeentiyada La Socda Codsiga

Dhammaan codsiyada Rukhsadda waa in ay la socdaan dhammaan macluumaadka lagu sheegay foomka codsiga ee la xiriira Rukhsadda gaarka ah ee la codsanayo.

## 8 Kharashka Qabshada Codsiga

Codsaduhu waa in marka uu soo gudbiyo Foomka Codsiga, uu bixiyo khidmad aan la soo celin karin oo ay u cayintay Hay'addu qabashada Codsiga.

## 9 Qabashada Codsiga

Marka la helo Codsiga, Hay'addu waa in ay ku qortaa taariikhda la helay waxayna u diri doontaa codsadaha qoraal caddaynaya sheegaya taariikhda la qabtay.

## 10. Xog Dheeraad ah

1. Hay'adda ayaa laga yaabaa, marka ay dib u eegis ku samayso Codsiga, in ay la socodsiiso codsadaha inuu ku keeno, muddo cayiman, macluumaad dheeraad ah oo

looga baahan yahay. Si kastaba ha ahaatee wakhtiga u dhexeeya helitaanka Codsiga iyo dukumentiyada la socda iyo taariikhda ay Hay’addu ogeysiiso Codsadaha ee ku filnaansho la'aanta dukumentiyada iyo macluumaadka waa in aanay ka badan 21 maalmood.

2. Codsigu waa dhici doonaa haddii codsaduhu uusan ku soo gudbin dhammaan dukumeentiyada loo baahan yahay lixdan (60) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ay Hay’addu codsato macluumaadka dheeraadka ah.
3. Codsiga dhacay dib looma hawlgelin karo. Si kastaba ha ahaatee, codsigan oo kale waxa dib loogu soo gudbin karaa codsi cusub ahaan, iyada oo la bixinayo kharashka codsiga.

## 11. Ogeysiinta Diiwaangelinta Codsiga ee wakhtiga saxda ah

Haddii ay Hay’addu u aragto in codsigu dhammaystiran yahay, waxa ay soo saaraysaa go'aan ah in codsiga si sax ah loo sameeyay. 21 maalmood gudahooda marka go'aanka la meel mariyo, Hay’addu waa in ay qoraal ku ogeysiiso codsadaha in codsiga si sax ah loo sameeyay.

## 12. Ogeysiinta Dadweynaha ee Codsiga

Soddon (30) maalmood gudahooda ka dib marka la helo ogaysiinta Hay’adda ee ah in Codsi si sax ah loo sameeyay, Codsaduhu waa in uu kharashkiisa ku daabacaa ogaysiis in codsiga la aqbalay ah.

## 13. Diidmada iyo Dhegaysiga

a. Qof kasta oo raba inuu diido bixinta Rukhsaddaas waa in uu soo gudbiyaa diidmo qoraal ah kow iyo labaatan (21) maalmood gudahood ah, laga bilaabo taariikhda Ogeysiiska Dadweynaha. Diidmada waa in lagu xareeyaa qaab codsi ah oo Hay’adda ku socda oo laba (2) nuqul oo waraaqo ah ama nuqul elektaroonig ah oo ku qoran qaabka “Microsoft Office” oo ku jira “USB drive” ama “CD-Rom”, ama lagu soo diro ciwaanka Hay’adda ee rasmiga ah.
b. Diidmada waa in ay Hay’addu la wadaagto Codsadaha si uu uga jawaabo.
c. Ka dib daabacaadda Ogeysiiska Dadweynaha iyo dhamaadka wakhtiga loo cayimay gudbinta diidmada, Hay’addu waxa ay Codsiga u astayn kartaa dhageysi oo dhacaya waqti cayiman, kadib marka la qiimeeyo lana tixgeliyo diidmo kasta oo la soo gudbiyay.
d. Hay’addu waxa ay ogeysiin doontaa dhageysiga iyo waqtiga uu qabsoomayo Codsadaha, dadka soo gudbiyay diidmada, iyo sidaas oo dhinac kasta oo ay Hay'addu u aragto in ay

khusayso. Hannaanka dhegaysigu waa in uu ahaadaa qaabka iyo sida ay u qeexday Hay'addu waxaana lagu soo gabagabeynayaa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah.

e. Hay'adda ayaa laga yaabaa in ay diiddo dhegaysiga noocaas ah haddii ay u aragto in diidmadu tahay mid aan macquul ahayn ama dhab ahayn.

f. Natiijooyinka Hay'addu gaadho ka dib weydiinta/dhegeysiga waa in lagu diwaangeliyaa qoraal.

## 14. Oggolaanshaha ama diidmada Rukhsadda

a. Ka dib markii la tixgeliyo codsiga iyo weydiinta haddii ay jirto, Hay'addu waxa ay bixinaysaa ama diidaysaa bixinta Rukhsadda.

b. Muddada u dhaxaysa ogaysiinta qabashada codsiga sida ku cad faqradda 9aad iyo taariikhda ay Hay'addu ogeysiiso codsadaha go'aankeeda ama go'aanka ay soo jeedinayso ee ah oggolaanshaha ama diidmada Rukhsadda sida ay xaaladdu tahayba, waa in aanay ka badnaan 90 Maalmood.

c. Marka ay Hay'addu ogolaato Rukhsadda, waa in ay ku war gelisaa codsadaha qoraal ahaan oggolaanshahaas iyo shuruudaha uu ku soo baxay, kaas oo ay ku jiraan kharashyada la bixinayo ka hor qaadashada Rukhsadda.

d. Haddii ay Hay'addu doonayso in ay diido bixinta Rukhsadda, waa in ay qoraal ku wargelisaa codsadaha iyada oo sheegaysa sababaha go'aanka.

e. Codsaduhu waa inuu helaa fursad uu xogo ku filan ugu soo bandhigo Hay'adda kow iyo labaatan (21) maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta codsaduhu helo ogeysiiska Hay'adda ee diidmada Rukhsadda.

f. Hay'addu waa inay tixgelisaa xogaha uu soo badhgigay codsaduhu oo, haddii bandhigaas lagu guuldareysto, ama aan la helin wax xog bixin ahba, waa in ay si sax ah oo qoraal ah u ogeysiiso codsadaha in Codsiga Rukhsadda la diiday.

g. Sababaha loo diiday Rukhsadda waa in ay si cad qoraal ahaan ugu sheegtaa Codsadaha.

# QAYBTA 3AAD

## WAX KA BEDELKA RUKHSADDA

### 15. Wax ka bedelka Rukhsadda la bixiyay:

**a.** Shuruudaha Rukhsadda ay bixiso Hay'addu waxaa la bedeli karaa;

- **I.** Haddii Rukhsadluhu ku soo codsado foomka lagu qeexay Jadwalka 3aad ee Xeer-nidaamiyahan;
- **II.** Haddii ay Hay'addu hesho cabasho ka timid macmiil, ururka macaamiil ama Rukhsadle kale;
- **III.** Ama tallaabo ay Hay'addu iskeed u qaaddo.

**b** Codsiga wax ka beddelka waxaa la samayn karaa wakhti kasta ka dib bixinta Rukhsadda, laakiin haddii ay dhicitaanka Rukhsadda ugu yaraan lix (6) bilood ka harsantahay lama aqbali doono.

**c** Dhammaan wax-ka-beddellada uusan bilaabin Rukhsadluhu, Hay'addu waxay wax ka beddeli kartaa Shuruudaha Rukhsadda xaaladaha soo socda:

- I. xaalad kasta oo jirta oo ka dhigaysa lagama maarmaan in Rukhsadda wax laga bedelo danta guud awgeed,
- II. Rukhsadluhu haddii uuna awoodin in uu buuxiyo shuruudaha ay dejisay Hay'addu qaarkood,
- III. Rukhsadlaha haddii uusan u hogaansamin qodobbada Xeer-nidaamiyaha qaarkood, Xeerarka Hay'adda, Xeerarka ama curfiga Suuqa, iyo Xeerarka Isku xirka, iyo
- IV. Haddii uu jiro isbeddel wax ku ool ah oo ku saabsan xaaladda Rukhsadaha.

**d** Ilaa si kale ay ugu qeexdo qoraal ahaan Hay'addu, codsaduhu waa inuu qabashada codsiga ku bixiyaa khidmad aan la soo celin karin, sida ay kolba Hay'addu u cayinto.

**e** Marka Rukhsadluhu soo codsado wax ka beddelka Rukhsadda, Rukhsadluhu waa in uu u daabacaa ogaysiiska wax ka beddelka la soo jeediyay ee Rukhsadda qaabka iyo habka ay u qeexday Hay'addu.

**f** Habka ku xusan Qaybta 2aad ee codsiga Rukhsadda, waa in la raaco marka laga hadlayo codsiga wax ka beddelka Rukhsadda; si kastaba ha ahaatee, marka wax-ka-beddelka la soo jeediyay uu yahay mid ka dhashay hindisaha Hay'adda, Hay'addu waxay mas'uul ka

tahay daabacaadda ogeysiiska dadweynaha ee sheegaya wax ka beddelka la soo jeediyay, haddii loo baahdo.

# QAYBTA 4AAD

## CUSBOONAYSIINTA RUKHSADDA

### 16. Cusboonaysiinta Ruksadda

**a.** Codsiga cusboonaysiinta Rukhsadda ay bixiso Hay'addu waa in la sameeyaa ugu yaraan sagaal (9) bilood ka hor inta ayna dhicin Rukhsadda waana in uu ahaadaa qaabka lagu qeexay Jadwalka 1C ee xeer-niddamiyahan.

**b.** Haddii aan si kale loogu sheegin qoraal Hay'addu soo saarto, codsaduhu waa in uu bixiyaa khidmad aan la soo celin karin sida ay kolba u go'aamiso Hay’addu markii laga qabanayo Codsiga.

**c.** Habka ku xusan Qaybta 2aad ee bixinta Rukhsadda waa in la raaco marka laga hadlayo Codsiga cusboonaysiinta Rukhsadda.

# QAYBTA 5AAD

## Joojinta iyo Baab’inta Rukhsadda

### 17. Joojinta Rukhsadda

**a.** Hay’adda ayaa marka ay cabasho ama macluumaad ka hesho adeegsade ( Macmiil) , ururka macaamiisha, ama Rukhsadle kale, in ay bilawdo baaritaan ku sahabsan hab dhaqanka ama hawlaha cid kasta oo Rukhsadle ah.

**b.** Hay’addu way hakin kartaa Rukhsadda ay bixisay haddii ruksadluhu:

**I.** Aanu awoodin in uu si buuxda u guto hawlaha ama waajibaadka lagu soo rogay Shuruudaha Rukhsadda, Sharciga, Xeerarka dhaqangalka ah; ama

**II.** Uu u hogaansami waayay Shuruudaha Rukhsaddan, Go'aammada ama tilmaamaha Hay’adda; ama

**III.** Uu u fulinayo ganacsigiisa Rukhsaddaysan qaab iyo hab khatar degdeg ah ku ah caafimaadka iyo badbaadada bulshada ama caafimaadka ama bedqabka qof kasta; ama

**IV.** Haddii Rukhsadluhu uu diido in uu u hogaansamo baaritaannada ama waydiimaha Hay'adda ama uu hor istaago sarkaal loo xilsaaray in uu sameeyo baaritaan ama uu ku guuldareysto in uu soo saaro dukumeenti lagu baarayo haddii ay Hay'addu farto; ama

**V.** Xaalad kasta oo jirta taas oo ka dhigaysa lagama maarmaan in danta guud darteed loo laalo Rukhsadda.

**c.** Hay'addu waa in ay qoraal ahaan ku wargelisaa cidda haysata Rukhsadda sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso joojinta Rukhsadda isla markaana siisaa Rukhsadlaha fursad uu ku soo bandhigo xog ka dhan ah joojinta la soo jeediyay ama uu ku saxo xaaladda ay ka dhalatay joojinta la soo jeediyay.

**d.** Marka Rukhsadluhu doorto in uu soo gudbiyo xogo ka dhan ah joojinta ama in u uku dhaqaaqo sixitaanka sababaha keenay joojinta Rukhsadda ee la soo jeediyay, waa in uu ku sameeyaa xog-gudbintiisa iyo/ama sixitaankiisa soddon (30) maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda uu ka helay Hay'adda warqad ogeysiin ah oo ku aaddan sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso joojinta Rukhsadda.

**e.** Hay'addu waa in ay garwaaqsataa xogaha uu soo gudbiyay Rukhsadluhu si loo gaadho go'aanka kama dambaysta ah. Go'aanka Hay'adda waa in lagu ogeysiiyo Rukhsadlaha qoraal ahaan.

**f.** Haddii ay Hay'addu go'aansato joojinta Rukhsadda, waa in ay ogaysiisaa qofka Rukhsadda haysta taariikhda ay shaqo ka joojintu dhaqangalayso, waxa ay Hay'addu samayn kartaa amaro ku saabsan qabashada codsiyada Rukhsado oo ay ku jirto amar awood u siinaya shakhsi kale ama Rukhsadle kale in uu la wareego hawlaha si loo sii wado bixinta adeegyada korontada.

**g.** Amarka joojinta kadib, Hay'addu waxa ay soo rogi kartaa dib u eegis ay ku samaynayso amarkaas isla markaana ay dib u shaqa galin kartaa Rukhsadlaha laga joojiyay Rukhsaddiisa, waxa ay sidoo kale soo saari kartaa go'aan ay ku baabi'inayso Rukhsadda si waafaqsan qodobbada 18 ee Xeer-nidaamiyahan.

**h.** Hay'addu ma soo rogi karto amar ka joojin ah in ka badan lix (6) bilood waxayna dib u eegis ku samayn kartaa amarkaas ka hor inta ayna dhammaan muddada joojinta ee la soo rogay.

## 18. Baabi'inta Rukhsadda

**a.** Hay'addu waxa ay marka ay hesho cabasho ama macluumaad ka socda macmiil, ururka macaamiisha ama Rukshsadle kale, bilaabi kartaa baaritaan ku saabsan dhaqan-gelinta ama shaqaynta Rukhsad kasta.

**b.** Hay'addu, way baabi'n kartaa Rukhsad haddii:

**I.** Rukhsadda lagu bixiyay isdaba-marin, been-abuur ama xaqiiqo qarin; ama

**II.** Rukhsadluhu si bareer ah ama sabab la'aan ah u jebiyo qodobbada Sharciga, Shuruucda iyo Xeerarka Hay'adda; ama

**III.** Rukhsadluhu ku guul daraysto in uu u hogaansamo shuruudda Rukhsadda kuwaas oo jabintoodu si cad loo tibaaxay in ay keenayso Rukhsad baabi'in;

**IV.** Rukhsadlaha uu hanti beelo ama ama lagu xukumo inuu musallafay; ama

**V.** Xaaladda maaliyadeed ee Rukhsadlaha ay keenayso in uusan Rukhsadluhu awoodin in uu si buuxda oo hufan u guto waajibaadka iyo masuuliyadda Rukhsadda.

**c.** Hay'addu, haddii ay ku qanacdo in ay jiraan sababo ku filan oo lagu burinayo Rukhsad, waa in ay ku ogaysiisaa baabi'inta Rukhsadda Rukhsadlaha iyo dhinacyada kale ay u aragto in ay khusayso.

**d.** Dacwadaha ay qaadayso Hay'adda ee ku sahabsan baabi'inta Rukhsadaha, ilaa iyo inta la dabiqi karo, waa in ay ahaataa qaabka ay u qeexday Hay'addu:

**I.** Hay'addu waa in ay qoraal ku ogaysiisaa qofka Rukhsadda haysta in la baabi'inayo Rukhsadda iyo sababta loo baabi'inayo, iyo;

**II.** Rukhsadluhu waa in uu helaa fursad uu ku muujiyo, lixdan (60) maalmood gudahooda soo gudbinta ogaysiintan ka dib, in xaaladuhu is beddeleen ama in baabi'inta aan looba baahnayn.

**e.** Haddii ay Hay'addu go'aansato in ay baabi'iso Rukhsadda ka dib markii ay u hoggaansanto nidaamka loo dejiyay, Hay'addu waa in ay u gudbisaa ogaysiis Rukhsadlaha kaas oo qeexaya taariikhda dhaqangalka baabi'inta.

**f.** Hay'addu waxa ay awood u leedahay halkii ay ka baabi'in lahayd Rukhsadda in ay soo saarto amarro kale oo ku soo rogaya shuruudo dheeraad ah Rukhsadalaha isaga oo loo ogolaan doono in uu ku sii shaqeeyo Rukhsadda haddii uu ka soo baxo.

**g.** Hay'addu marka ay baabi'iso Rukhsadda, waxa ay soo saari kartaa amaro la xiriira qabashada codsiyo Rukhsadeed, ama tilmaamaha kale ee lagama maarmaanka u ah

joogtaynta bixinta adeegga koronto, iyo horumarinta ujeeddoyinka korantada qaranka sida uu Sharcigu dhigayo.

## 19. La Noqoshada Rukhsadda

**a.** Hay'addu waxa ay la noqon karyaa Rukhsadda xarumaha aan weli shaqayn haddii Rukhsadluhu:

**I.** Ku helay Rukhsadda is-dabamarin ama been-abuur ama xaqiiqo qarin; ama

**II.** Si bareer ah ama si marmarsiiyo la'aan ah u jebiyay qodobbada Sharciga, Shuruucda iyo Xeerarka qabanaya;

**III.** Ku guul daraystay in uu u hoggaansamo marxaladihii la soo dhaafay ee Rukhsadda;

**IV.** Ka soo horjeeda shuruud kasta oo u taalla Rukhsadda;

**V.** Hanti beelo ama lagu xukumo musalaf; ama

**VI.** ku guul daraystay in uu hawlgeliyo xarumaha Rukhsaddaysan ee ku taxan Jadwalka saddex (3) sano gudahood laga bilaabo taariikhda la siiyay Rukhsadda.

**b.** Hay'addu waa in ay qoraal ahaan ku wargelisaa cidda haysata Rukhsadda sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso in lagala noqdo Rukhsadda oo ay siiso Rukhsadlaha fursad maangal ah oo uu ku sameeyo xog-bixin lid ku ah soo jeedinta kala noqoshada.

**c.** Marka uu Rukhsadluhu doorto in uu xog bixiyo, waa in uu xog-bixintiisa ku sameeyaa soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda uu helo warqadda Hay'addu ku wargelinayso sababaha ay Hay'addu u soo jeedinayso in lagala noqdo Rukhsadda.

**d.** Hay'addu waa in ay garwaaqsataa xog-bixinta uu sameeyay Rukhsadluhu si loo gaaro go'aanka kama dambaysta ah. Go'aanka Hay'adda waa in lagu ogeysiiyaa Rukhsadlaha qoraal ahaan.

**e.** Haddii ay Hay'addu go'aansato in ay kala noqoto Rukhsadda, waa in ay qoraal ku ogaysiisaa cida Rukhsadda haysata go'aankeeda, waxayna soo saaraysaa amaro dhaqan gal ah.

**f.** Rukhsadda lala noqday dib looma hawlgelin karo, lama beddeli karo, lama cusboonaysiin karo, lamana kordhin karo muddadeeda. Si kastaba ha ahaatee, codsi kale ayuu ku soo gudbin karaa isla Rukhsadluhu, marka uu bixiyo khidmadda loo qoondeeyay.

# QAYBTA 6aad

## QODOBBO ISKU DHAFAN

### 20. Dib-u-eegista iyo Racfaanka

**a.** Qof kasta oo uu dhib ka soo gaaro go'aan ka soo baxay Hay'adda sida waafaqsan Xeer-nidaamiyaha, waxa uu kow iyo labaatan (30) maalmood gudahooda ka dib marka go'aanka la gaaray, ka codsan karaa Hay'adda in dib-u-eegis lagu sameeyo arrimaha soo socda:

**I.** Amar ay Hay'addu bixisay;

**II.** Go'aan ay Hay'addu ku gaartay inaan la bixin Rukhsad;

**III.** Go'aan ay Hay'adda ku diidday cusboonaysiinta, beddelka ama kordhinta muddada Rukhsadda; ama

**IV.** Go'aan ay Hay'addu kula noqonayso, laalayso ama ku baabi'inayso Rukhsadda.

**b.** Hay'addu waa inay si waafaqsan Xeerarkeeda Dacwadda dib u xaqiijiso, dib u eegtaa, beddeshaa ama ka noqotaa go'aankeeda ka hor intaysan soo saarin amarka kama dambaysta ah.

**c.** Dib-u-eegista ama tix-galinta noocaas ah waa in lagu dhammeeyaa lixdan (60) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda la codsado.

**d.** Dhammaan amarada, ama go'aammada Hay'addu waxaa ka furan dib u eegis garsoor si waafaqsan Sharciga.

### 21. Ka noqoshada Codsiyada

**a.** Codsiga Rukhsadda, wax ka beddelka, cusboonaysiinta, ama kordhinta wakhtiga Rukhsadda waxa uu codsaduhu xilli kasta kagaga noqon karaa qoraal.

**b.** Codsiga laga laabtay dib looma hawlgelin karo, in kasta oo codsigaas dib loo soo gudbin karo si la mid ah codsiyada cusub, marka la bixiyo kharashka khidmadda ee la cayimay.

### 22. Wax ka bedelka ama burinta Xeerarka

a. Hay'addu waxay wax ka beddeli kartaa ama burin kartaa qodobbada Xeerarkan iyada oo ka tala gelinaysa ama usoo bandhigaysa daneeyayaasha koronta , si waafaqsan sharciga korontada , 2023

Shaabadda Guud ee <Hay’adda Korontada Qaranka>/<Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha>

SAXIIXA:

[Taariikhda]